

2023-2024 Tallaalka COVID-19 ee La Cusboonaysiiyay: Xarunta Daryeelka Muddada Dheer

Vaccinate WA
CovidVaccineWA.org

Waa maxay tallaalka COVID-19 ee 2023-2024 ee la cusboonaysiiyay? Miyuu beegsanayaa noocyada ugu cusub ee fayraska?

Tallaalka la cusboonaysiiyay ee COVID-19 2023-2024 waa tallaalka ugu cusub oo ay ansixiyeen Food and Drug Administration (FDA, Maamulka Daawooyinka iyo Cuntada) iyo waxaa ku taliyay Centers for Disease Control and Prevention (CDC, Xarumaha Xarumaha a iyo Kahortagga Cudurrada). Fayraska sababaya xanuunka COVID-19 wuu isbadelay wakhti kadib, isagoo isku bedelay noocyo kala duwan. Tallaalkan wuxuu beegsandoonaa noocyada cusub ee hadda sababaya infekshinada intooda ugu badan iyo isbitaal dhigista ee gudaha Dalka Maraykanka. Tallaalkan wuxuu celinayaa korna u qaadayaa difaaca ka dhanka ah noocyada fayraska ee hadda socda.

Yaa qaadanaya tallaalka la cusboonaysiiyay ee COVID-19 ee 2023-2024?

Dadka waaweyn waa inay qaataan hal doos oo ah tallaalka la cusboonaysiiyay ee COVID-19 ee 2023-2024. Dadka waaweyn qaarkood eehabdhiska difaaca jirkoodu uu daciifka yahay waxaa laga yaabaa inay u baahdaan kuuro dheeraad ah. Tallaalka la cusboonaysiiyay waa in la bixiyaa ugu yeraan laba bilood kadib qaadashada dooskii ugu dambeeyay haddii qofka hore loo tallaalay.

Waa maxay sababta tallaalka la cusboonaysiiyay ee 2023-24 muhiim ugu yahay shaqaalaha iyo dadka deegaanka ah ee ku jira daryeelka muddada dheer?

Dadka isbitaal loo dhigey sababo la xiriira caabuqyada fayraska ku dhaca habdhiska neefsashada ayaa ka badnaa intii caadiga ahayd sanadkii la soo dhaafay. Caabuqyadaan waxay dhicikaraan isla wakhti waxayna kordhin karaan khatarta ah in qofka ladhigo isbitaal ama dhimasho. Tallaalka waxay lakab ku kordhiyaan difaaca ka dhanka ah caabuqyada ku dhici lahaa shaqaalaha iyo dadka deegaanka ah.



- Dadka waaweyn ee da'adoodu tahay 65 sano iyo kuwa ka wayn, gaar ahaan kuwa ku jira goobaha LTC, waxay khatar badan ugu jiraan dhibaatooyin caafimaadoo aad u daran oo ay kala kulmi karaan COVID-19 iyo xanuunada kale ee ku dhaca habdhiska neefsigamaadaama habdhiska difaaca jirkoodu uu daciif yahay.

Ku dhiiragelinta qoysaska iyo dadka la degan inay qaataan tallaalka

Dhisitaanka kalsoonida shaqaalaha, dadka, deegaanka ah, iyo qoysaska ayaa ah mid muhiim ah. Abuurista isgaarsiin joogto ah oodaahfuran oo ku saabsan xaalada uu hadda marayo COVID-19 oo gudaha xarunta ah iyo tallaabooyinka ka-hortagga ahee ay dhaqangelinayaan shaqaalaha ayaa gacan ka gaysan kara dhisitaanka kalsoonidaan. Dadka degan LTCF's iyo qoysaskooda waa in lala socodsiiyaa in hadba dadka ugu badan ee ku nool hal goob, ayaa waxaa sii badanaya khatarta ubayla noqoshada. Qoysaska la wadaag siyaabaha ay gacan uga gaysan karaan ilaalinta badbaadada xubnaha qoysaskooda iyo bulshadaiyo ka ilaalinta xanuunada daran iyagoo qaadanaya talaadada ugu dambeeyey ee tallaalka COVID-19 ah.

Sida loo bixiyo tallaalka aadu xoogan talo-bbdn:

- Dadka la wadaag muhiimada qaadashada tallaalka.
- Ka jawaab su'aalaha iyo walaacyada dadka deegaanka ah, oo xasuusi in faa'iidooyinka laga helo qaadashada tallaalka ay ka culays badan yihiin khataraha lagala kulmo.
- Sharaxaad ka bixi khataraha macquulka ah ee lagala kulmi karo xanuunka [COVID-19](#) (lagu heli karo Isbaanish) marka aan la qaadan tallaalka.

Shaqaalaha LTCF waxay la kulmaan shaqada ugu dhibaataada badan ee ah inay daryeelaan dadka ay saamaysay xanuunada iyagoonaftoodana ka ilaalinaya caabuqa. **Naftaadiyo dadka deegaanka ahba ku ilaall tallaalka la cusboonaysiiyay ee COVID-19 ee 2023-2024.**

